

Tixraacayaga: AMDM/JF
Tixraacaaga:

Anne-Marie Davies Macleod
Head of Resources & Performance
(Madaxa Khayraadka & Hawlfulinta)

Education & Children's Services
(Waxbarashada & Adeegyada Carruurta)
Woodhill House
Westburn Road
Aberdeen
AB16 5GB

Ku: Parents/Carers (Waalidka/Daryeeleyaasha)

Telefoonka: [01467 533400](tel:01467533400)
limayl: fsm@aberdeenshire.gov.uk

Juun 2026

Qaali Waalidka/Daryeeleyaasha

Lacagbixinta tooska ah ee Cuntooyinka Bilaashka ah ee Dugsiga ee Fasaxa Xagaaga ee 2026

Dhammaan ardayda hadda xaq u leh cuntooyinka bilaashka ah ee dugsiga ee qaanuuniga ah ayaa dhawaan heli doona lacagbixin dhan £77.50 si loogu daboolo muddada fasaxa Xagaaga ee laga bilaabo 3 July 2026 ilaa 14 August 2026. Fadlan ogsoonow – cuntooyinka bilaashka ah ee dugsiga ee qaanuuniga ah waxaa loogu deeqaa waalidiinta/daryeeleyaasha marka la eego duruufaha ama xaaladda dakhligooda. Lacagbixinta fasaxu ma khusayso carruurta ku jirta darajada Dugsiga hoose 1 ilaa 5 oo iyagu xaq u leh cuntooyinka bilaashka ah ee guud ee dugsiga ama carruurta ku jirta darajada Dugsiga hoose 6 ilaa 7 oo iyagu xaq u leh cuntooyinka bilaashka ah ee dugsiga sababtoo ah waalidkooda oo qaata Lacagbixinta Ilmaha Skotishka ah (Scottish Child Payment) (taasoo aanan ku salaysanayn dakhliga).

Miyaan anigu u baahan ahay in aan codsado maalgelintan goormee ayaanan lacagta heli doonaa?

Qoysaska u qalma ee hore u hela cuntooyinka bilaashka ah ee dugsiga ee qaanuuniga ah, waajib kuma aha in ay codsadaan lacagbixintan. Lacagta ayaa toos loogu shubi doonaa akownka bangiga ee aad magacaabatay maalinta

3 July 2026

Anigu waxaan dhawaan codsaday Cuntooyinka Bilaashka ah ee Dugsiga, laakiin la ima ogaysiin natiijada ka soo baxday

Haddii aad dhawaan codsatay cuntooyinka bilaashka ah ee dugsiga ee dakhliga ku salaysan, fadlan ogow oo niyaddu ha kuugu degto in aan codsashooyinka dhammaantood uga shaqaynayno sida ugu dhakhso badan ee suurogalka ah, waxaan adiga toos kuula soo xiriiri doonaa marka codsashadaada shaqadeeda la dhammaystiro.

Qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee laakiin aanan hadda helin cuntooyinka bilaashka ah ee dugsi ayaa hubin kara xaq u yeelashada marka ay buuxiyaan foomka internetka ee soo socda:

[Hubi xaq u yeelashada oo codso cuntooyinka bilaashka ah ee dugsi](#)

Carruurta waxay u qalmaan cuntooyinka bilaashka ah ee dugsi haddii waalidkooda (ama daryeeleyaashoodu) ay qaataan dheef ama lacag cayr oo loogu qalmo.

Dheefaha iyo gunnooyinka hadda loogu qalmo waa:

- Gunnada togan ee Hawlgabka (Gunnada togan ee Hubaal ah) (Pension Credit (Guarantee Credit))
- Qaybta dakhliga ku xiran ee Gunnada Taageerada Shaqada (Employment Support Allowance)
- Taageerada lagu helo Qaybta VI ee **[Sharciga Haajiraadda iyo Magangalyada ee 1999](#)**
- Gunnada Guud (Universal Credit) marka aad loo-shaqeeyahaaga ka hesho mushaar saafi ah bishii oo ka yar £ 995 (waxay tani ku salaysan tahay mushaarkaaga saafiga ah ee dhabta ah, kuma salaysna caddadka ay isticmaasho Gunnada Guud)
(dheefaha iyo gunnooyinka loogu qalmo ayaa is beddeli kara)

Haddii ay da'daadu tahay 16-18 jir oo aad iskaa u qaadata mid ka mid ah dheefaha loogu qalmo ee kor ku xusan, waxaad codsan kartaa cuntooyinka bilaashka ah ee dugsi.

Waalidiinta carruurta ku jirta darajada Dugsi hoose 6 / 7 ee iyagu qaata Lacagbixinta Ilmaha Skotishka ah

Xataa haddii aadan ugu qalmin shardiga caadiga ah ee dakhliga ku salaysan, ilmahaaga ayaa **weli ugu qalmi kara** barnaamijkan cusub ee ay soo saartay Dawladda Skotishka ah. Ballaarintani waxay hadda khusaysa oo keliya ardayda darajada Dugsi hoose 6 iyo 7 oo hadda ma gaarayso ardayda dugsi dhexe.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo aad codsasho u dirato fadlan booqo **<https://www.aberdeenshire.gov.uk/schools/school-info/assistance/free-school-meals/>**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Lacagbixinta Ilmaha Skotishka ah ee cusub ee laga helo Badbaadada Bulsheed ee Skotland (Social Security Scotland) ayaa weliba laga heli karaa halkan **www.mygov.scot/scottish-child-payment**.

Fadlan ogsoonow in kooxda Cuntooyinka Bilaashka ah ee Dugsi (fsm@aberdeenshire.gov.uk) ay masuul ka yihiin oo keliya in ay qiimeeyaan u qalmista cuntooyinka bilaashka ah ee dugsi. Haddii aad qabto weydiimo ku saabsan akownka iPay ee ilmahaaga—sida baaqiga ama dhibaatooyinka gelitaanka - fadlan wac lambarka 03456 081202 ama iimayl ugu dir **ECSImpactPayQueries@aberdeenshire.gov.uk**. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa halkan: **<https://www.aberdeenshire.gov.uk/schools/school-info/meals/online-payments/>**

Daacad kuu ah



Anne-Marie Davies Macleod
Madaxa Khayraadka iyo Hawfulinta
Waxbarashada iyo Adeegyada Carruurta